

Xiriirada

Waxaad maanta la kulantay:

Anaga na soo mar ama soo wac:

Maareynta xogta shaqsiga

Waxa uu Jobbtorg Stockholm maareynayaa adiga xogtaata shaqsiga. Xogta shakhsiga ee aanu maareyno waa lambarka shakhsiga, magaca, cinwaanka, lambarka telefoonka, e-maylka. Ujeedada laga leeyahay maareynta waa si loogu awoodo in la maareeyo adiga kiiskaaga oo laguugu sii taageero inaad waxbarasho ama shaqo sii wadato.

Xaaladaha aanad adigu dhiibin xogtaada shaqsiga ayaanu taas ka helnay kaaliyahaaga arrimaha bulshada ee jooga maamulka degmada.


Xeerka gundhiga u ah maareynta xogtaada shakhsigu waa ku dhaqanka awooda dawladdimo ee ku saleysan xeerka adeega bulshada iyo danta guud. Marka kiiskaaga la soo gebogabeeyo ayaa xogtaada shaqsiga laga takhalusi doonaa ama la keydin doonaa iyadoo lagu saleynaayo xeerarka markaas jira.

Haddii aad u maleyneyso inaanu qaab aan la oggolaan xogtaada u isticmaalnay, ayaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiyo Datainspektionen. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adiga xuquuqdaada iyo sida magaaladu ugu maareynayso xogtaada shaqsiga ayaad ka heli kartaa stockholm.se/dataskydd.

Arbetsmarknadsnämnden ayaa mas'uul ka ah maareynta xogta shaqsiga iyadoo xogtaada shakhsigana maareynaaya oo ilaalinaaya iyadoo la raacaayo xeerka ilaalinta xogta (GDPR).

Jobbtorg Stockholm

– dariiqaaga aad ku gaareyso shaqo ama waxbarasho



Waxa uu qof kastaa awoodaa, sida ku salsyan xaaladiisa iyo taageerada saxda ah, inuu shaqo helo oo uu wax barto.

Maxaanu Jobbtorg qabanaa?

Jobbcoachen ayaa ku caawinaya oo ku taageeraaya waxaad rabto inaad mustaqbalka ka shaqeeyso. Waxa uu Coach-ku sidoo kale kaa caawin kara markaad shaqo bixiye la hadlayso, aad goobaha kala duduwan ee shaqada booqaneyso ama aad shaqo isku tijaabinayso/isku dayeyso.

La taliyaha- waxbarashada iyo xirfadaha ayaa adiga kaa caawin kara inaad horay ugu sii mariso fikirkaaga ah inaad wax barato.

Baraha IT-ga ayaa taageeradaada ah markaad dalab hal ama dhowr shaqooyin u qoranaysid



Waxaanu wadajir kuugu siineynaa taageero goobta shaqada iyo makaad wax baraneyso!

Waxyaalahan ayaanu kaa caawin karnaa:

- Xiriirada loo shaqeeyaha
- Booqashooyinka waxbarasho ahaaneed
- Taageerada goobta shaqada
- Tabobar
- Tabobarka shaqada
- Koorsooyin-ka xirfada
- La talinta waxbarashada iyo
- xirfadaha Waxaad leedahay bilow



Maxaa dhacaya markaan Jobbtorg isqoro?

1. Waxaynu ku bilaabi inaynu wadajir uga hadalno cidda aad tahay iyo waxaad rabto.
2. Iyadoo taas lagu saleynaayo ayaynu ka wada hadli doonaa shaqooyinka adiga kugu habboon. Waxaad haysataa fursada aad mid ama wax ka badan oo shaqooyin ah iskugu tijaabiso.
3. Ujeeddadu waxa weeye inaad haysato shaqo himilooyinka aad leedahay ku salasyan.



Waxyaabahan ayaa adiga kuu mihiim ah inaad ka fikirto!

- A Inaad si firfircoon shaqo ugu raadsato
- Inaad raacdo qorshaha shaqada ee aad isla qaadateen
- Inaad raacdo qorsheynta aad xafiiska shaqada (arbetsförmedlingen) la leedahay
- In lagu heli karro si annaga iyo loo shaqeeyayaashu aanu kuula soo xiriiri karno

Haddii aanad kulan la gorsheeyey imaan karin – na soo wac!

Waxa muhiim ah inaad soo sheegto haddii aad jiran tahay ama aanad imaan karin. Waxa uu Jobbtorg warbixinta maqnaanshaha u gudbinayaa waaxda kaalmada dhaqaalaha (försörjningsstöd). Maqnaanshaha ayaa saameyn kara xaquuqdaada kaalamada dhaqaale.

